

Xeerka Maamulka 15 Maarso 1957, lamba. 61 rep

Guddiga loo xilsaaray in ay ka soo shaqeeyaan Xeerka Ciqaabta Soomaaliya.

MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka 27 Disembar lamba. 19, ee Xukuumadda Soomaaliya u wakiishay in ay soo saaraan Xeerka Ciqaabta Soomaaliya;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la magacaabo Guddiga soo darsa kana soo shaqeeya mashruuca ku saabsan Xeerka la soo sheegay;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Waxaa la dhisay Guddii soo darsa soona diyaariya Xeerka Ciqaabta Soomaaliya oo ka kooban:

Guddoomiye:	Wasiirka Arrimaha Guud Xaaji Muuse Boqor
Xubin:	Xildhibaan Sh. Aadan Axmed Muuse
“	Xildhibaan Sh. Yuusuf Axmed Nuur
“	Xildhibaan Cali Majuub Cali
“	Xildhibaan Yaasiin Cabduraxmaan Xasan
“	Xildhibaan Sh. Maxamed Cabdalle Islaam
“	Xildhibaan uaglio Avv. Carlo
“	Xildhibaan Rizzetto Dr. Fulvio
“	Khabiir Chapron Avv. Gaetano
“	Khabiir Cabdi Sh. Aadan Maxamed
“	Khabiir Maxamed Cawaale Liibaan
“	Qaalli Sh. Abubakar Xaaji Cabdullaahi
“	Xoghaye: Tucci Dr. Mano

Qod. 2

Guddigaan sharciyan waxaa xubin ka noqonaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama garsoore uu isagu soo magacaabo.

Qod. 3

Guddiga saldhigiisu wuxuu noqonayaa Garyaqaanka Guud kaasoo loo xilsaaray in uu hawlaha guddiyada kale.

Qod. 4

Qoraal doodeedka (maxdarka) waxaa fadhi kasta ka samaynaya xoghayaha kaaso lagu soo darayo warbixinta kama dambaysta ah.

Qod. 5

Xubnaha guddiga waxaa u sugnaatay dhaqaale ay ku qaadanayaan ka soo qaybgalka fadhiyada sida ku cad qod. 2 ee Dekereetada 10 Setembar 1956, lamba. 94.

Kharashka arrinta la xariira wuxuu saaranyahay Cutubka 76 – ee hawlgal miisaaniyadeedka.

Muqdisho, 15 Maarso 1957.

Maamulaha

P. Franco

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Waa la Hubiyay lana Diiwaangaliyay – Diw. Lamba, 2, bogga lamba. 110.

Muqdisho 30 Maarso 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**